

# GOORMA AYUU MAQNAANSHUHU NOQDAA DHIB?

Maalin walba oo uu ilmahaagu ka maqnaado iskoolka, **wax ka badan 6 saacadood** oo wakhti waxbarasho ah ayaa ka lumaya.

**Saaran Dhabbada Guusha**  
maqnaasho ah 9 maalmood  
ama ka yar



0 1 2 3 4 5 6 7 8 9



**Halis Qarka u Saaran**  
10 ilaa 17 maalmood

10 12 12 13 14 15 16 17

**Ka Dhacsan Dhabbaha**  
18 maalmood ama ka badan




18 19 20 21 22 23 24 25

# XOG DHEERAAD AH



Sawirka kaamirada ku aaddi lambarka QR Code si aad u heshid kaalandarka degmada ama booqo [spps.org/calendar](https://spps.org/calendar).

**Imaanshaha Iskoolku waa Muhiim (SAM)**  
**Xafiiska Taageeridda Iskoolka**

 651-767-8164

 [spps.org/attendance](https://spps.org/attendance)

Kala xiriir iskoolkaaga wixii xog dheeraad ah ama iimayl u dir **Lisa Lyons** [lisa.lyons@spps.org](mailto:lisa.lyons@spps.org) (waa ardayda ka weyn 12 sano).



*Xogaha ku jira buug-yarahan waxaa laga soo qaatay bogga la dhaho Attendance Works (imaanshaha iskoolka waa wax fiican) ee [Attendanceworks.org](https://Attendanceworks.org).*

# SOO XAADIRIDDA ISKOOLKU WAA MUHIIM



**Xafiiska Taageeridda Iskoolka**  
651-767-8164 • [spps.org/attendance](https://spps.org/attendance)

# SHARCIGA IMAANSHAHA

Markii laga diiwaangeliyo dugsiga dadweynaha, ilmaha da 'diisu u dhaxayso 5 jir ilaa 17 sano jir waa inuu helaa duruus ilaa iyo intuu ka qalin-jebinayo.

## MAQNAANSHAHA CUDURDAARKA LEH

- ✓ **Jirro** (iskoolku wuxuu codsan karaa warqad caafimaad haddii ay jiraan 3 ama in ka badan oo maalmood oo jirro ah oo isku xigo, ama jirrooyin saa'id ah)
- ✓ **Fasaxyada Diinta**
- ✓ **Xaaladaha Arrimaha Degdegga ah ee Qoyska**
- ✓ **Ballamada Caafimaadka /Caafimaadka Dhimirka / Ilkaha**  
(marka ay suurtoagal tahay, ballan qabso xilli ka baxsan saacadaha iskoolka oo ka dhig ballanta iskoolka ka hor ama ka dib)

## MAQNAANSHAHA AAN CUDURDAARKA LAHAYN

- ✗ Safarka/Fasaxa
- ✗ Daalka shaqada/safarka
- ✗ Cimilada: Aad u Kulul/Aad u Qabow
- ✗ Ilmo la xannaanneenayo
- ✗ Dhibaato Dhanka Gaariga ah
- ✗ Baska oo kaa Tegay
- ✗ Hurdo lagu Daahay
- ✗ Tallaal La 'aan
- ✗ Guriga oo lagaaga Baahan yahay

# MA OG TAHAY?

- In ardaygu uu iskoolka ka maqnaado wax ka yar sagaal maalmood sannad walba ay ka caawinayso ardayda inay wax bartaan, guulo ka gaaraan waxbarashada iskoolka iyo inay saarnaadaan waddadii ay wakhtigii la rabay ku qalin jebin lahaayeen.
- Maqnaanshaha soo noqnoqda wuxuu noqon karaa calaamad muujinaysa in ardaygu uu luminayo xiisaha iskoolka, inuu la harjado waxbarashada iskoolka, walaaca iskoolka, iyo inuu la harjado qof asxaabtiisa ka mid ah ama uu wajahayo dhibaato kale.
- Fasalka 6-aad markii la gaaro, maqnaanshaha waa mid ka mid ah saddex calaamadood oo muujinaya in ardayga laga yaabo inuu ka haro dugsiga sare.
- Markii la gaaro fasalka 9aad, imaanshaha waa saadaaliye u wanaagsan heerarka qalin-jabinta ee ardayga marka loo eego buundooyinka laga helo imtixaanka fasalka 8aad.

# WAXA AAD SAMEYN KARTO

Ogow xeerka imaanshaha iskoolka. Fiiri imaatinka ardaygaaga si aad u hubisid in maqnaanshaha uusan ka sii darin.

- Kala hadal ilmahaaga muhiimadda ay leedahay in iskoolka la yimaado wakhtigii loogu talagalay maalin walba iyo fasal walba.
- Ka caawi ardaygaaga inuu joogteeyo hawlaha jadwalka maalinlaha ah, sida dhameystirka shaqada guri, helidda hurdo wanaagsan iyo joogteynta jadwal ah habeenkii iyo subaxdii inta lagu jiro toddobaadka iskoolku socdo.
- Isku day inaad ballan u qabsan caafimaadka, caafimaadka dhimirka ama ballamaha ilkaha inta lagu jiro saacadaha iskoolka.
- Ka caawi ardaygaaga inuu ka qeybgalo waxbarashada.
- Haddii ay aad u xanuunsan yihiin oo ay ku qasbanaadaan inay joogaan guriga, la soo xiriir iskoolkaaga si aad u soo sheegtid maqnaanshahooda.
- Marka ay tahay inay ka maqnaadaan iskoolka, ku dhiirrigeli iyaga inay weydiyaan macallimiinta macluumaad iyo duruusta fasalka si ay u soo dhammaystiraan saacadihii waxbarasho ee seegay.
- La soco horumarka tacliimeed ee ardaygaaga oo caawinaad ka raadso macallimiinta ama kuwa dadka duruusta ka caawiyo (tutors) marka loo baahdo.
- Hubi inaad cusbooneysiisid xogta meesha lagaala soo xiriiri karo, lambarka taleefanka, iimaylka iyo cinwaannada qoyska
- Ku dhiirri-geli ardaygaaga inuu ku biiro hawlo bulsho oo macno leh kuwaasoo baxo saacadaha iskoolka kadib sida isboortiga, naadiyada ama barnaamijyada dugsiga kadib.
- Ogeysii oo taageer ardaydaada haddii ay ka soo muuqdaan calaamadaha walaaca. Iskoollo badan oo SPPS ka mid ah waxaa laga helaa shaqaale iyo barnaamijyo taageero bixiyo. Waxaad wax badan ka baran kartaa adigoo la xiriiro la-taliyaha iskoolka iyo shaqaalaha arrimaha bulshada. La hadal macallinka ardaygaaga, maamulayaasha, ama shaqaalaha kale ee iskoolka ee bixiyo taageerada.